



HABRAACA WAJIGA KOWAAD EE MAALGALINTA SANDUUQA

HABRAACA WAJIGA KOWAAD EE MAALGALINTA SANDUUQA

GOGAL DHIG

Sanduuqa Horumarinta Dhallinyaradda Jamhuuriyadda Somaliland waa barnaamij-dhaqaale oo loogu talagalay horumarinta hal-abuuradda Ganacsiga ee dhalinyaradda, si looga caawiyo dhalinyaradu in ay ka shaqaysiiyaan awoodooda una abuurtaan ganacsiyo cusub ama u ballaadhiyaan ganacsiyo hore u jiray, Si kor loogu qaado fursadaha dhaqaale ee shaqo abuurka iyadoo loo marayo maalgelinta hal-abuurka ganacsiga ee dhallinyarada

UJEEDADA SANDUUQA

Ujeedoodinka Sanduuqa Horumarinta Dhallinyaradu Jamhuuriyadda Somaliland waxa ka mid ah;

- Inuu ka caawiyo dhalinyaradda inay ka faa'iideystaan awoodooda maskaxeed iyo xirfadeed isla markaana iskood u abuuran-karaan shaqooyin horseedaya horumarka dhaqan dhaqaale ee dalka
- Inay dhallinyaradu helaan taageero iyo gacan qabasho dhaqaale Si loo dhiiri geliyo awoodooda hal-abuurnimo, una abuuraan ganacsiyo cusub ama u ballaadhiyaan ganacsiyo hore u jiray,
- In la kobciyo aqoonta iyo xirfadaha hal-abuurnimo ee dhallinyarada iyada la siinayo tabobaro, haggis iyo la talin.
- In la helo bulsho leh dhallinyaro awood u leh inay ka horumaraan baahiyaha Dhaqan-dhaqaale, bulsho, maskaxeed iyo mid nafsii ahaaneedba, isla markaana hela fursado horumarineed, kana xor ah jahli, maandooriye, qabyaalad iyo ka qaybgalka denbiyada,

KA FAA'IIDAYSTAYAASHA MAALGALINTA SANDUUQA

Maalgalinta Sanduuqa Horumarinta dhallinyarada Jamhuuriyadda Somaliland ee wajiga kowaad waxaa ka faa'iidayshanara

- Dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 20-35 ee la yimaado hal-abuuro ganacsi oo meel mar ah
- Dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 20-35 ee hore ganacsiyo u aas aastay una baahan gacanqabasho dhaqaale ama mid xirfadeed si ganacsigoodu hore ugu maro.

QAABABKA MAALGALINTA

Wajiga kowaad ee maalgalinta hal-abuurada ganacsi ee dhallinyarada waxaa loo raaci doonaa qaabka maalgalinta isku dhafan (hybrid investment). Waxaa lagu maalgalin doona hal-abuurada ganacsi qadar maalglineed oo dayn ah oo mudo cayimin dib loogu soo celindoona iyo qadar deeq ah oo aan la soo celinayn.

GANACSIYADA TIXGALINTA DHEERAADKA AH LEH

Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada Somaliland waxaa uu tixgalin dheeraad ah siinayaa maalgalinta ganacsiyada ku qotama baahida bulsho, hal-abuurnimo ku dheehan yahay isla markaana kobci kara kuna salaysan ila dhaqaalaha ee dalka ee ay ka mid ka yihiin;; tamarta, wax soo saarka Beeraha, wax soo saarka Xoolaha, kaluumaysiga, tiknoolojiyadda, dalxiiska iyo adeegyada kale muhiimka (tourism and other potential services) iyo kuwa kale la mid ah.

GANACSIYADA AAN SANDUUQA LAGA MAAL-GELINAYN

Sanduuqa horumarinta dhallinyarada lagama maalgelin doono ganacsiyada waxyeelada u leh deegaanka, ka ganacsiga daroogadda iyo maandooriyaha iyo ganacsiyada xeerarka dalku mamnuuceen.

SHURUUDAHA MAALGALINTA SANDUUQA

Shuruudaha maalgalinta ee Sanduuqa horumarinta dhallinyarada JSL waxaa kala baxayaa laba qayboo oo kal ah:

✓ Shuuradaha Soo Codsashada Maalgalinta:

- Muwaadin u dhashay Jamhuuriyadda Somaliland
- Aqoonsiga muwaadinka (national ID) JSL
- Da'da u dhaxaysaa 20-35 jir
- U diyaar ah ka midho dhalinta fikrada ganacsi
- Waa in uu haysto ruqsad ganacsi oo shaqaynaysa (haddi ganacsigu hore u jiray)
- Bixinta cashuurta moorka (stamp duty tax) oo dhan **SL.SH 20,000** laguna bixin doono halka xafiiska cashuuraha bariga uga dhaw ee degaankaaka.

✓ Shuruudaha Gudoosiinta Maalgalinta

- Waa in tartamuhu ka soo gudbo dhamaan maraxilka kala duwan ee qiimaynta
- Waa in codsaduuhu keenaa damiinal maal
- Waa in tartamaha ku guulaysta maalgalintu 3-5% qadarka ku baxaya maalgalinta ganacsigiisa ku darsadaa.
- Waa in guulaystaasha maalgalintu heshiiska la saxeexdaa baanka maalgalinta la marinayo oo ka wakiil ah sanduuqa

NAADINTA FURSADHA MAALGALINTA

Fursadaha maalgalineed ee sanduuqa horumarinta dhallinyarada waxa loo naadinayaa hab daah-furan, waxana lagu baahinayaa warbaahinta kala duwan ee dalka sida Raadiyaha, Telefshanada, baraha bulshada iyo mareegta sanduuqa sidoo kalana waxaa nuqalo wargalinta fursadaha maalgalinta laga heli doonaa xafiiskyada dad adeegyada dadwaynaha ee gobolada iyo degmooyinka sida dawlaha hoose, xafiiska gudoomiyaha gobalka iyo xarumaha kale ee la mid ka ah.

CODSIGA MAALGALINTA

Codsiyada maalgelinta sanduuqa horumarinta dhalinyadu waxa uu mari doonaa marxalado is daba socda oo kala duwan si loo helo hal-abuur ganacsi ee ku haboon in la siiyo maalgelin. Maraaxilka ay marayaan codsiyadaasina waxay kala yihiin kuwan hoos ku xusan;

- i. **Marxaladda kowaad :-** soo gudbinta Codsiga ee habka online ka ah, (Online Mobile Application System). Habkan waxaa loo marayaa talaabooyinka hoos ku xusan
 - o Codsaduhu waxaa uu Play Store-ka Mobile-ka (Samsang Smart Phone) kala soo dagayaa Application-ka “Sanduuqa Dhallinyarada”
 - o Codsaduhu waxaa uu Appka “Sanduuqa Dhallinyarada” ka dooran doonaa luqadda Somaliga ama Ingiriisiga marba ka u fudud.
 - o Codsaduhu waxaa uu soo buuxin doona dhamaan macluumaadka looga baahan yahay ee Appka “Sanduuqa Dhallinyarada” ku xusan.
 - o Codsaduhu waxaa ku uu soo gudbin doonaa maclumadka uu buuxiyay mudadda loo cayimay.
- ii. **Marxaladda Labaad :-** soo gudbinta qorshaha fikradda ganacsi oo dhamaystiran (Full Business proposal submission) waxay tartamayaasha ka soo gudba marxaladda kowaad ee codsiga maalgalintu appka sanduuqa ay hore iskaga diwaan galiyeen kala soo degi doonaa xaashida codsiga fikrada ganacsi(Business proposal Application form) halkaas oo ay ku soo buuxin doonaan qorshaha fikradooda ganacsi
- iii. **Marxaladda Sadexad (Difaaca Fikrada Ganacsi/Business Idea Pitching):** Tartamayaasha ka soo gudba marxalada labaad ee codsiga maalgalintu waxay qorshahooda ganacsi ka hor difaaci doonaan gudida kala saarista tartamayaasha maalgalinta

KALA SAARISTA CODSIYADA


Codsiyada tartamayaasha waxaa kala saari doonta gudidda kala saarista codsiyada oo adeegsan doona habraacyada u yaala qiimaynta hal-abuurada ganacsi ee tartamayaasha.

BAAHINTA NATIJADA CODSIYADA MAALGALINTA

Sanduuqu waxaa si daaha furan u baahin doonaa natijada marxaladaha kala duwan ee codsiyada tartamayaasha maalgalinta. Natijadaha waxaa lagu baahin doonaa mareegta sanduuqa iyo bogaga arimaha bulshadda. Tartamayaasha fikradahooda ganacsi guulaystaan waxaa looga yeedhi doona xafiiska Sanduuqa Horumarinta Dhallinyarada.

Jaantuuska Habka Maalgalinta

16.2 Jaantuska Habka Maalgalinta



3